



Waxa aad Rabto in aad ogaatid

Laga bilaabo bisha Sibteembar 2023, Fasaxa Mushaaraysan ee Oregon waxaa lasiin doonaa inta badan shaqaalaha Oregon isagoo ku siinaya fasax lacag bixin kadib dhalashada cunug ama korsashada cunug, adiga ama qofka aad jeceshahay hadii ay jirto xaaland caafimaad oo halis ah ama hadii aad la kulanto faraxumayn, rabshad guri, dhibaatayn, ama dabagal

### **Waa maxay faa'iidooyinka lagu bixiyo Fasaxa Mushaaraysan ee Oregon iyo cidda xaqa u leh?**

Shaqaalaha Oregon ee kasbaday ugu yaraan \$1,000 sannadkii hore waxa laga yaabaa inay u qalmaan Fasax caafimaad, mid qoys oo leh ama badqabka ilaa 12 toddobaad oo ah Fasax Mushaaraysan oo ay ka faa'idaystaan sanadkiiba. Inta ay ku jiraan fasaxa, Fasaxa Mushaaraysan ee Oregon waxa ay siisaa shaqaalaha boqolkiiba qayb kamid ah mushaharkooda. Qadarka macaashka waxay ku xiran tahay waxa uu shaqaale helay sannadkii hore.

### **Yaa bixiya kharashka Bixinta Fasaxa Musgaaraysan ee Oregon?**

Laga bilaabo 1-da Janaayo 2023, shaqaalaha iyo loo-shaqeeyayaashu waxay wax ku biirin doonaan Fasaxa Mushaaraysan ee Oregon iyada oo loo marayo canshuuraha mushaar bixinta. Qaaraankan waxa loo xisaabiyyaa boqolkiiba qayb kamid ah musharka, shaqbixiyahaagu waxa uu ka jari doonaa qayptaada qiumaha tabaruca jeegaaga musharka.

### **Goorma ayaa la'iiga baahanyahay inaan u sheego loo-shaqeeyahayga in aan rabo Fasax Mushaaraysan?**

Hadii fasaxaagu yahay mustaqbal ka dhaw, waxaa lagaa rabaa inaad ogaysiiso cidda aad u shaqayso ugu yaraan 30 maalmood ka hor inta aadan bilaabin fasaxaaga qoyska, caafimaadka ama badqabka, Haddii aadan bixin ogeysiiska loo baahan yahay, Fasaxa Mushaaraysan ee Oregon waxaa laga yaabaa inuu hoos u dhigo faa'iidadaada toddobaadlaha ah boqlkiiba 25%.

### **Sideen u codsadaa Fasax Mushaaraysan?**

Sibteembar 2023, waxaaad ka dalban kartaa Fasaxa Mushaaraysan ee Oregon qaab onleen ah paidleave.oregon.gov ama waxaad gaysan kartaa codsi waraaqad ah waaxda. Haddii codsigaaga la diido, waxaaad ka dacwoon kartaa go'aanka Waaxda Shaqada ee Oregon.

### **Waa maxay xuquuqdayda?**

Hadii aad u qalanto fasax mushaaraysan, loo-shaqeeyahaagu kaama hor istaagi karo inaad qaadato. Shaqadaada waa la ilaaliyaa marka aad qaadanayso fasaxa mushaaraysan haddii aad u shaqaynaysay loo-shaqeeyahaaga ugu yaraan 90 maalmo taariikheed oo isku xigta. Ma lumin doontid xuquuqahaaga hawlgabka markaad fasaxa ku jirto oo loo-shaqeeyahaagu waa inuu ku sii wadaa dheefaha caafimaad ee la midka ah markaad shaqaynayso.

### **Sidee macluumaadkayga loo ilaalinayaa?**

Macluumaad kasta oo caafimaad oo la xiriira qoyska, fasaxa caafimaad ama badqabkaaga ee aad doorato inaad la wadaagto loo-shaqeeyahaaga waa sir waxaana lagu sii dayn karaa oo keliya ogolaanshahaaga, ilaa siidaynta aanu u baahnayn sharci.

### **Ka waran hadii aan su'aalo aan kaqabo xuquuqdayda?**

Waa sharci daro in loo-shaqeeyaha uu ku takooro ama kaa aargoosto sababtoo ah waxaad waydiisatay faa'iidooyinka Fasaxa mushaaraysan. Hadii loo-shaqeeyaha aanu raacin sharciga, waxaad xaq u leedahay inaad dacwo ama cabasho u gudbisisid xafiiska iyo warshadaha ee Oregon(BOLI). Waxaad ashtako ku gudbin kartaa qaab onleen, taleefon ama iimayl:

**Shabakada:** [www.oregon.gov/boli](http://www.oregon.gov/boli)

**Wac:** 971-245-3844

**iimayl:** [help@boli.oregon.gov](mailto:help@boli.oregon.gov)

### **Wax ka ogow asaxa mushaaraysan**

**Shabakada:** [paidleave.oregon.gov](http://paidleave.oregon.gov)

**Wac:** 833-854-0166

**iimayl:** [paidleave@oregon.gov](mailto:paidleave@oregon.gov)